



## Qaraarka guddigu waa mid taageeraya DACA

Guddiga PPS waxay caddeysay in ay degmadu taageerayso riyoodayaasha “dreamers” – ardayda iyo xubnaha shaqaalaha ee iyaga oo yar yar ay Maraykanka keeneen waalidiintooda muhaajirka ah.

Cod la isku raacay, ayay guddigu ku ansixisay qaraar ku baaqaya in Congress-ku ilaaliyo kuwa hoos taga barnaamijka Hakinta Talaabo Ka Qaadida Carruurta Timid “Deferred Action for Childhood Arrivals”, ama DACA, oo ah barnaamij uu oggolaaday Madaxweyne Barack Obama.

Xubnaha guddiga ee Julie Esparza Brown iyo Rita Moore ayaa hormuud ka ahaa qaraarka ka dib markii Madaxweyne Donald Trump ku dhawaaqay in uu qorshaynayo ka noqoshada DACA.

“Waan ognahay in kuwa badan oo ka mid ah ardaydeena, qaar ka mid ah shaqaalaheena iyo xubno ka tirsan bulshadeena ay saameyn ku yeelanayso tallaabadi,” ayay sheegtay Esparza Brown. “Waa mas’uuliyad saaran bulshadeena oo dhan in ay taageeraan riyoodayaashan “dreamers”. Waxay taageereen dhaqaalaheena waxayna xirfado badan u keenaan shaqaalaheena.”

Qaraarku wuxuu xaqiijinayaa in guddiga iyo degmadu ay taageerayaan dadka ka diiwaangeshan DACA, wuxuuna dib u xaqiijinayaa siyaasadda PPS in ay noqoto “meel ammaan ah oo loogu talagalay carruurta, shaqaalaha iyo qoysaska,” ayay sheegtay Esparza Brown.

Wakiilka guddiga ardayga Moses Tran ayaa sheegay in PPS loo baahan tahay in ay bixiso ilo dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda muhaajiriinta ah. Waxuu tilmaamay u leeyahay saaxiib ka mid ah riyoodayaasha “dreamers” DACA. “Runtii way mid cabsi u leh iyada,” ayuu ka yiri go'aanka lagaga noqonayo barnaamijka. Meelo laga sii gelayo ilaha ayaa lagu dari doonaa website-ka PPS.